

Waa maxay jihataynta bulshada?

Jihataynta bulshada waa koorso lacag la'aan ah oo ku siin doonta adiga ku cusub sidii aad fahan aasaasi ah u laheyd bulshada iswiidhishka. Kaqaybgalka, waxaad kuheleysaa aqoon ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, dimoqraadiyada iswiidhishka iyo sida bulshada iswiidhishka loo abaabulay. Ujeedada jihataynta bulshada ayaa ah in ay kuu fududaato inaad dhex gasho bulshada iswiidhishka. Waxaad ku aqrinkartaa koorlada luuqaddaada hooyo ama luqad kale oo aad si fiican u taqaanid oo jihataynta bulshada waa in ay fursad u siisaa wada-hadal iyo aragti. Markaad dhameyso kooraska waxaad heli doontaa shahaado.

Kumaa qaadan kara koorlada?

Jihataynta bulshada waxaa loogu talagalay adiga inta u dhexeysa 18 iyo 64 sano, ku cusub Iswiidhan oo leh qorshe aasaasi ah ama soogalooti reer ah.

Jihataynta bulshada lama siinayo adiga muwaaddin ka ah waddan ETA ama Switzerland, soogalootiga shaqada ama ardayga martida ah / cilmi baadhe martida ah.

Muxuu yahay koorasku?

Koorladu waxay ku saabsan tahay xuquuqda aadanaha iyo qiyamka dimoqraadiga ah ee aasaasiga ah, xuquuqaha iyo waajibaadka qofka, iyo sidoo kale sida bulshada loo abaabulay iyo sida nolol maalmeedka u shaqeeyo.

Tan waxaa lagu soo daray siddeedda mawduuc ee soo socda:

- Markad timaado Sweden
- Ku noolaashaha Sweden
- In la taageero oo lagu horumariyo dalka Sweden
- Xuquuqda iyo waajibaadka qofka
- Qoys sameynta iyo la noolaashada caruurta ku nool Sweden
- Si aad saameyn ugu yeelatid Sweden
- Si loo daryeelo caafimaadkooda Sweden
- Ku gabowga Sweden